# Golaha Wakiillada JSL

## Waaxda Shuruucda, Hadal-qoraalka iyo Fadhiyada

### *Golihii 5aad Kal-fadhigii 10aad, Fadhigii 14aad*

*20 January 2025*

**Quraanka:** Md. Axmed Dayib Aadan (ku-cadeeye)

**Gudoonka: - Yaasiin X. Maxamuud Xiir (Faratoon)**

**Ajandaha Fadhiga: -** Warbixinta *Xeer ilaaliyaha Guud ee Qaranka JSL*

**Guddoomiyaha:-** Mudanayaal, sida aad u jeedaan maanta waxa halkan fadhiya Xeer-ilaaliyihii Guud ee Qaranka iyo tiimkiisii. Waxaannu ka codsannay in Xeerka Ciqaabta Guud ee laydiin qaybiyey uu dul maro, isla markaana inoogu sharaxo qodobbada ugu muhiimsan iyo ahmiyaddiisa. Xeer-ilaaliyaha Guud waxa uu ka diyaariyey summary iyo qodobo lagu dabaqi karo xeerkan, kuwaas oo idin la wadaagay, xeerkiinnana waa laydiin dhiibay. Haddaba, aan si wanaagsan u dhegaysanno.

**Md. Cabdiraxmaan Jaamac Hayaan – Xeer-ilaaliyaha Guud:-** "Bismillaahi Raxmaani Raxiim. Guddoomiyaha, Shir-guddoonka, Mudanayaasha sharafta leh, ku-xigeennada Xeer-ilaalinta ee ila socda, lataliyeyaasha sharciga ee Golaha Wakiillada, iyo dhammaan shaqaalaha Golaha—marka hore dhammaantiin waan salaamayaa, Assalaamu Calaykum Waraxmatullaahi Wabarakaatuh.

Sharaf weyn ayay ii tahay maanta inaan idin hor keeno mashruuc sharci oo ah Xeerka Ciqaabta Guud, kaas oo muddo dheer Qaranka Somaliland laga soo shaqaynayey.

Mashruucan sharci markii ugu horreysay waxa soo gudbisay Xukuumaddii hore ee Somaliland. Maalmihii u dambeeyey ayaa mar kale laydiin soo gudbiyey, balse xaqiiqadu waxay tahay in xeerkan muddo badan laga soo shaqaynayey. Taariikh ahaan, Guddiga Dib-u-Habaynta Shuruucda Somaliland ayaa bilaabay hawshiisa ku dhowaad 10 sano ka hor. Markii hore waxay isku dayeen inay sameeyaan kaabis iyo wax-ka-beddel, ka dibna waxay u gudbiyeen Garyaqaanka Guud, isaguna waxa uu u gudbiyey Xukuumaddii hore ee Somaliland, taas oo dib noogu soo celisay. Maaddaama Xeer-ilaaliyaha Guud uu yahay hay'adda ugu horreysa ee dabaqda Xeerka Ciqaabta, doorkiisu aad buu muhiim u yahay.

Intaa ka dib, xeerkan dib ayaan u eegnay, waxyaabo badanna waanu ka qabanay. Xeerkani waxa uu jiray in ka badan 100 sano, maadaama asal ahaan uu ka soo jeedo Xeerkii Talyaaniga ee 1930-kii, kaas oo lagu dabaqi jiray dalalkii uu gumaysan jiray, gaar ahaan Koonfurta Soomaaliya. Somaliland-na waxa markaas lagu dabaqi jiray Indian Penal Code, oo ahaa xeer gaar ah.

Xeerkani waa mid ka mid ah xeerarka guud ee Qaranka. Ka sokow Dastuurka, waa xeerka labaad ee Qarankani ku taagan yahay. Sidaa darteed, ahmiyad weyn ayuu leeyahay, isla markaana ku-dhaqankiisu waa tiir muhiim ah. Marka laga reebo Dastuurka, Xeerka Ciqaabta Guud, Xeerka Maamulka iyo Xeerka Maaliyadda ayaa ah xeerarka ay dawladnimadu ku taagan tahay. Dawladdu awooddeeda iyo sida ay ula xisaabtanto muwaadiniinta ku nool xuduudaheeda, haddii ay galaan dembiyo ama xadgudubyo sharci, waxay si toos ah ugu xidhan tahay xeerarkan, gaar ahaan Xeerka Ciqaabta Guud. Xeerkani waxa uu ka koobnaa markii hore 565 qodob.

### *Mabaadi'da Guud ee Xeerkan*

Xeerka Ciqaabta Guud waxa uu qeexayaa dembiyada ciqaabta ah iyo ujeeddooyinka waaweyn ee uu ku dhisan yahay, kuwaas oo ah ilaalinta amniga iyo xasilloonida bulshada Somaliland.

Xeerkani waxa uu mamnuucayaa dembiyada waaweyn, qof kasta oo gala fal-dambiyeedna waxa uu mutaysanayaa ciqaabta ku habboon. Xeerku waxa uu sidoo kale dhigaya magdhaw madani ah iyo xuquuq loo siinayo dhibbanayaasha. Guud ahaan, waxa laga dheehanayaa in uu ka tarjumayo dhaqanka suubban ee bulshada.

### *Taariikhda Xeerka*

Marka dib loogu noqdo taariikhda ka hor intii aanay Somaliland maxmiyad Ingiriis ah noqon, waxa lagu dhaqmi jiray Indian Penal Code. Intaa ka dib, markii labada dal ee Somaliland iyo Soomaaliya ay xoroobeen, xeerkii ugu horreeyey ee Somaliland loo dejiyey waxa uu ahaa 1886-kii, kaas oo ahaa Indian Penal Code. Taasi waxay socotay ilaa 1963-kii, markaas oo la aasaasay Xeerka Ciqaabta Guud. Kadib midowgii labada gobol ee Soomaaliya iyo Somaliland, ayaa la bilaabay ku-dhaqankiisa, sidaas ayaana lagu dhaqmayay ilaa maanta.

Xeerka Ciqaabta Guud ee Soomaaliyeed waxa si rasmi ah loo bilaabay ku-dhaqankiisa 2-dii Abriil 1964-kii.

Markii Somaliland ka baxday midowgii Soomaaliya 1991-kii, waxa la go'aansaday in la sii isticmaalo xeerarkii hore ee Dawladdii Soomaaliya, sida uu dhigayo Qodobka 130aad, faqraddiisa 5aad ee Dastuurka Qaranka, kaas oo faraya in xeerarkii hore lagu sii dhaqmo inta wax laga beddelayo lana waafajinayo Dastuurka JSL. Sidaas ayaana lagu dhaqmayay.

### *Sababaha Dib-u-Habaynta*

Sababta ugu weyn ee loogu baahday in la beddelo xeerkan waa in uu noqdo mid ilaalinaya qaranimada iyo jiritaanka dawladnimada Somaliland. Xeerkii hore waxa uu ku dhisnaa ilaalinta Jamhuuriyaddii Soomaaliya, mana ahayn mid waafaqsan Dastuurka

JSL. Waxa kale oo uu ahaa xeer gaboobay oo Talyaanigu sameeyey 1930-kii, wax yarna ay Soomaalidu ka beddeshay, isla markaana shaqaynayey in ka badan 100 sano.

Xeerkan hore kuma jirin dembiyada casriga ah sida argagixisada, tahriibinta dadka, iyo dembiyada la xidhiidha tiknoolajiyadda. Sidaa darteed, xeerkii hore ma uusan la jaanqaadi karin dembiyada maanta taagan. Qaar ka mid ah dembiyadaas waxa loo sameeyey xeerar gaar ah, sida xeerka maandooriyaha iyo xeerka musuqmaasuqa.

Ciqaabo badan oo ku jiray xeerkii hore ma ahayn kuwo ku habboon culayska dembiyada. Tusaale ahaan, ka mid ahaanshaha kooxo hubaysan ama kooxo argagixiso ciqaabtoodu waxay ahayd mid hooseysa marka loo eego khatarta ay ku hayaan amniga qaranka. Arrimahaas oo dhan waxay garsoorayaasha ku abuureen dhibaato ku saabsan sida loo dabaqo sharciga, gaar ahaan dembiyada abaabulan (organized crime) sida burcad-badeedda, tahriibinta dadka iyo argagixisada.

Sidoo kale, ganaaxyada xeerku waxa ay ku salaysnaayeen lacagtii hore ee Soomaaliya, taas oo aan maanta la jaanqaadi karin xaaladda dhaqaale ee Somaliland. Sidaas darteed, dhammaan arrimahaas awgood, waxa loo baahday in xeerkan dib loo habeeyo.

### *Waxyaabaha Cusub ee Xeerkan Soo Kordhiyey*

Mashruucan sharci ee iminka la idin hor keenay waa mid:

- Waafaqsan Dastuurka JSL,
- Ilaalinaya qaranimada, nabadgelyada iyo jiritaanka Qaranka JSL,
- La jaanqaadaya Shareecada Islaamka, gaar ahaan madhabka Imaam Shaafici,
- Waafaqsan xuquuqda aadanaha, sida:
- In aan ciqaab dil ah lagu fulin haweeney uur leh,
- In aan ciqaab lagu fulin hooyo nuujinaysa ilaa ilmuhu ka gudhayo naaska,
- In aan la ciqaabin ilmo ka yar 15 sano,
- In ciqaabta laga fududeeyo qof da'diisu ka weyn tahay 70 sano.

Arrimahan oo dhan waxay ka tarjumayaan mabaadi'da Shareecada Islaamka. Xeerkani waxa kale oo uu la jaanqaadayaa dembiyada casriga ah, ganaaxyadiisana waxa lagu saleeyey lacagta Jamhuuriyadda Somaliland.

Waxyaabaha lagu soo kordhiyay xeerkan waxaa ka mid ah: Xeerkii hore waxa uu ka koobnaa 565 qodob, halka xeerkan cusubi ka kooban yahay 665 qodob, sidaas awgeedna waxaa lagu kordhiyay 60 qodob.

Cutubka 1aad ee xeerkii hore waxa uu ka bilaabmayay Qodobka 1aad ilaa Qodobka 183aad, imikana waxa lagu kordhiyay ilaa 205 qodob.

Cutubka 2aad oo markii hore ka bilaabmayay Qodobka 184aad ilaa 321aad, iminka waxa uu ka bilaabmayaa Qodobka 205aad, kuna egyahay Qodobka 562aad.

Cutubka 3aad oo markii hore ka bilaabmayay Qodobka 505aad kuna ekaa 525aad, iminka Cutubka 3aad waxa uu ka bilaabmayaa Qodobka 565aad, kuna dhammaanayaa Qodobka 625aad. Halkaas ayaana ku dhammaanayaan dhammaan qodobadii sharcigu.

Waxyaabaha kale ee xeerkan lagu soo daray dhinaca Shareecada Islaamka waxaa ka mid ah arrimaha la xidhiidha ciqaabta ee hoos ku xusan:

Dambiyada tuugada xadka ah waxa loo qaybiyay laba qaybood: qayb xad leh oo nisaabkii sharciga gaadhaya, iyo qayb aan xad lahayn. Labadan qodob ayaa lagu soo daray xeerka.

Ka noqoshada diinta Islaamka (Riddo): Arrintani hore uma jirin, imikana waa lagu daray. Ninka ka riddooba diinta Islaamka waxa la farayaa inuu toobad keeno muddo bil ah, haddii kale dambiga ridada ayaa lagu qaadi doonaa.

Kufsiga iyo xadgudubyada jinsiga: Qaybo ka mid ah xeerkii hore ee jinsiga, kuwaas oo muran ka taagnaa, ayaa dib loo habeeyay, qaybo ka mid ahna waa lagu soo daray.

Waxa kale oo ku jira luwaadka, ama dadka isku jinsiga ah ee isu taga.

Qisaasta dhaawacyada: Hore dhaawacyadu qisaas uma lahayn, imikana qofka si kas ah u dhaawaca qof kale, dhibbanuhu xaq buu u leeyahay inuu ka goosto qisaasta dhaawaca loo geystay ama uu qaato magdhaw, ama labadaba.

Qaybta guud, qodobada wax laga beddelay waxaa ka mid ah in xeerkan loo aqoonsaday inuu yahay xeer guud oo saldhig u ah nidaamka caddaaladda iyo ciqaabta, isla markaana waafaqsan Dastuurka JSL.

Mabaadi'da kale ee xeerkan lagu soo daray waxaa ka mid ah khasabka jidheed ee qof loo geysto. Tusaale ahaan, haddii qof lagu khasbo inuu qof kale dilo, xeerkii hore waxa uu bannaynayay in qofka la khasbay uu falkaas sameeyo. Hase yeeshee, Shareecada Islaamku laba arrimood ayay ka reebtay khasabka, kuwaas oo ah dilka iyo sinada. Labadaas lama oggola, qofka lagu khasbana masuul buu ka noqonayaa falka, hase yeeshee masuuliyaddaas waa laga fududaynayaa.

Difaaca sharciga ah sida ay Shareecada Islaamku dhigtay ayaa sidoo kale lagu saleeyay. Marka ay daruuro timaaddo ama qof ogolaado in la dilo (sida waxa loo yaqaan mawtul raxma), Shareecada Islaamku arrintaas way diidan tahay, inkasta oo qawaaniinta waddamo qaarkood ay bannaynayaan. Tusaale ahaan, haddii qof ku yidhaahdo "nafta iga qaad," Shareecada Islaamku ma oggola. Sidoo kale, haddii nin xabbad rido isaga oo u malaynaya bahal dabadeedna qof ku dhaco, masuuliyadda dilka tooska ah waa laga qaadayaa, balse masuuliyad kale ayuu yeelanayaa. Arrimahaas oo dhan waxay ku jiraan xeerkan.

Xeerkan waxa kale oo la waafajiyay la-dagaallanka mukhaadaraadka, iyadoo xeerkii la-dagaallanka mukhaadaraadka la soo raray lana dhex geliyay xeerkan.

Waxaa la saaray qodobadii hore ee xeerka ciqaabta ku jiray ee ka hor imanayay Xeerka Lr. 21 ee 2001, gaar ahaan qodobada 465 ilaa 469.

Waxa kale oo lagu soo daray dambiyada argagixisada, anagoo adeegsanayna qabyo-qoraalkii la diyaariyey sannadkii 2014-kii ee ilaa maanta horyaalla Baarlamaanka. Qodobo la xidhiidha qaraaxyada, dilalka badheedhka ah, iyo xadgudubyada ka dhanka ah qaranka ayaa laga soo qaatay, lana dhex geliyay xeerkan, kuwaas oo la jaanqaadaya xeerarka caalamiga ah ee la-dagaallanka argagixisada isla markaana ilaalinaya amniga guud ee Qaranka JSL. Dambiyada argagixisada ee hore ugu jiray xeerka ciqaabta waxa ay ahaayeen laba qodob oo keliya.

Dambiyada musuqmaasuqa hantida qaranka: Xeerkii Lr. 38/2007 ee Baarlamaanku dejiyay ayaa la waafajiyay, waxaana meesha laga saaray qodobadii hore ee aan la jaanqaadi karin xeerkaas.

Ka ganacsiga tahriibinta dadka: Waxa la waafajiyay xeerka ka hortagga ka ganacsiga dadka ee 2021, gaar ahaan qodobada 509 iyo 511. Dadka la ururiyo, lagu xidho xerooyin, lana tahriibiyo, iyo kuwa ka shaqeeya dhammaantood waxa lagu marsiinayaa ciqaabta ku cad xeerkaas.

Waxaa sidoo kale laga saaray qodobadii ka hadlayay adoonsiga ama gediska dadka, waxaana lagu beddelay hab casri ah oo ku saabsan ka ganacsiga dadka.

Waxa jira xeer horyaalla Golaha oo ka hadlaya dambiyada ka dhex dhaca internetka, waxaana qaybo ka mid ah qabyo-qoraalka xeerkaas lagu daray xeerkan.

Waxa kale oo laga saaray qodobadii hore ee aan la jaanqaadi karin waxyaabaha cusub ee lagu daray.

Qodobada lagu soo daray waxaa ka mid ah qodob ka hadlaya ceebaynta, nacaybka iyo isku diridda bulshada iyo qabaa'ilka, kaas oo lagu qeexay Qodobka 372aad.

Qodobada ka hadlaya iibinta hilibka aan waafaqsanayn xeerarka baadhista iyo ilaalinta hilibka, iyo ilaalinta badbaadada cuntooyinka, ayaa ku jira xeerkan.

Waxa kale oo ku jira qodob ka hadlaya soo bandhigista calan shisheeye, kaas oo ah Qodobka 569aad.

Qodobada ka hadlaya been-abuurka lacagta elektaroonigga ah, sida fariimaha sheegaya in lacag la diray iyada oo aan dhab ahaan la dirin, ayaa lagu daray. Hore waxa la ciqaabi jiray oo keliya been-abuurka lacagta waraaqaha ah ama shilinka Somaliland,

imikana waxaa la ciqaabayaa lacagta elektaroonigga ah ee been-abuurka ah, sida ku cad Qodobka 396aad.

Waxa kale oo lagu daray qodobo ka hadlaya ku xadgudubka magaca iyo astaanta shakhsiga qaanuuniga ah, iyo ceebaynta shirkadaha iyo shakhsiyaadka.

Fakinta maxaabiista dagaalka iyo gargaariddooda waxa ka hadlaya Qodobka 214aad.

Burburinta ama carqaladaynta hubka iyo isgaadhsiinta ciidanka waxa ka hadlaya Qodobka 220aad.

Tababarka sharci-darrada ah waxa ka hadlaya Qodobka 234aad.

Xidhiidhka dirayska iyo calaamadaha ciidanka Somaliland, iyo samayntooda, xeerka ayay ku jiraan.

Samaynta iyo ka ganacsiga hubka iyo rasaasta ee aan waafaqsanayn xeerka xakamaynta hubka iyo rasaasta ee Xeerka Lr. 70/1995 iyo xeerka xakamaynta hubka fudud ee Xeerka Lr. 39/2010, waxa ka hadlaya Qodobka 509aad.

Waxa kale oo la hagaajiyay qodobo badan si ay ula jaanqaadaan xeerarka caalamiga ah. Ganaaxyadii lacageed ee hore u ahaa kuwo Soomaaliyeed ayaa loo beddelay kuwo waafaqsan lacagta Jamhuuriyadda Somaliland, waxaana laga saaray dhammaan wixii Soomaaliya la xidhiidha, iyadoo xeerka dib loogu celiyay asalkiisii Somaliland.

Waxa sidoo kale la saxay lahjaddii uu ku qornaa xeerkii hore oo u badnayd lahjadda reer Xamar.

Faa'iidada uu leeyahay xeerkan waxaa ka mid ah in la mideeyay xeerar badan oo kala daadsanaa, laguna soo ururiyay hal xeer oo ka kooban 665 qodob. Taasi waxay fududaynaysaa shaqada garsoorayaasha, xeer-ilaaliyayaasha iyo booliiska, kuwaas oo hore ugu adkayd inay mar kasta is barbar dhigaan xeerar badan si ay u dabaqaan dembiyada kala duwan. Sidaas awgeed ayaa mashruucan sharci la isugu keenay, waxaana la doonayaa in Golaha Wakiilladu ka guto waajibaadkiisa, maadaama ay tahay hawl qaran oo xukuumado horeba ka soo shaqeeyeen.

Ugu dambayn, waxa la rajaynayaa in dawladan cusubi mustaqbalka saxeexdo xeerkan. Sidaas darteed, waxaanu idinka codsanaynaa in xeerkan sida ugu dhakhsaha badan loo ansixiyo, si garsoorayaasha iyo xeer-ilaaliyayaashu u gutaan waajibaadkooda shaqo.

Waxaanu sidoo kale soo jeedinaynaa in marka xeerkan loo wareejiyo Guddiga Shuruucda lagu daro guddiyo aqoon u leh Shareecada Islaamka, sida Guddiga Shareecada Islaamka, Guddiga Garsoorka, Guddiga Arrimaha Gudaha, iyo Guddiga Dabagalka Hantida Qaranka, maaddaama xeerkani uu taabanayo dhammaan dhinacyadaas.

**Md. Ibraahim Maxamed Jaamac (Khaddar-Guun) – Su'aal:** Xeerkani waa xeerkii ciqaabta Soomaaliya oo dil ku jiray, waana tii rag badan birta la dhaafiyey. Waxaan weydiinayaa Xeer-ilaaliyaha Guud: xeerkani Somaliland dawladdeeda 6aad baa maanta joogta, maxaa muddadaa dheer loogu xukumayay xeerkii dilka ee Soomaaliya? Waan ku faraxsanahay in maanta la sameeyo oo la isku geeyo hal buug.

Su'aasha labaad, maalin walba Somaliland dad baa la xidhaa, guryahana waa loo dhacaa. Dastuurku waxa uu qorayaa in qofka dembigiisa lagu soo oogo, waaranna lagu soo goosto maxkamad marka qof la qabanayo. Weli xeer dhigaya in dadka loo daato meelena kuma hayno, maxay taasi mar walba u dhacdaa?

Waxaan kale oo aan weydiinayaa, maadaama aad tahay ninkii warqadda u jaray Xildhibaan Abiib oo maanta maqan, inaan su'aashan ku weydiiyo: maxaad u adeegsatay xildhibaan xasaanad leh, xeer noocee ah ayaad u adeegsatay waraaqihii aad nagu soo celisay, ka dibna arrintaas si hoose loogu dhammeeyey, maxay ahayd ee aad ku heshay awoodaa in aad xildhibaan xasaanad leh oo waliba Gollahayagii aad la muranto oo Gudoomiyahayagii aad waraaqaha aad ku soo celinaysay taana ka qanci Gollaha?

**Md. Axmed Maxamed Hure (Barkhad) – Hadal/Soo jeedin:** Sida uu Xeer-ilaaliyuhu tilmaamay, xeerkani baahi weyn ayaa loo qabay. Waa xeer muddo soo socday, waana xeer ay ku soo biireen isbeddellada nolosha. Anigoo ixtiraamaya mudanaha iga horreeyay, isla markaana sugaya in su'aalihiisa laga jawaabo, waxaan soo jeedin lahaa in wixii hadal ah ee intaa ka dambeeya aynaan su'aalo ku weydiin Xeer-ilaaliyaha, balse xeerka la akhriyo, wixii aynu ka soo saarno na marka Golaha loogu yeedho ayaan soo jeedin lahaa.

**Xeer-ilaaliyaha Guud – Jawaab:** Maanta waxa aynu ka hadlaynaa Xeerka Ciqaabta Guud; kama hadlayno siyaasad iyo xadhig. Xeerka ciqaabtu muddo ku dhow 30 sano ayuu soo jiitamayay. Markii ugu horreysay ee hawshiisa si rasmi ah loo bilaabay waxay ahayd 2010-kii, intii ka horreysayna sida loogu dhaqmayay xeerkaa ayaa lagu dhaqmayay. Markii la sameeyay guddiga loo yaqaan Guddiga Dib-u-Habaynta Shuruucda, oo loogu talagalay dib-u-habaynta shuruucda dalka sida Xeerka Ciqaabta, Xeerka Habka Ciqaabta, Xeerka Madaniga, iyo Xeerka Habka Madaniga, dhammaantoodna waxay ahaayeen xeerarkii Soomaaliya. Guddiga dib-u-eegista shuruucdu dhammaan xeerarkaas wuu ka shaqeeyay.

Waxa loo baahan yahay in xukuumaddu ay soo gudbiso xeerarka si rasmi ah oo ay idiin soo hor dhigto. Hore ayaa laydiin soo gudbiyay xeerarkan, balse ma ahayn kuwo rasmi ah, guddi ayaana loo saaray. Waqtiga iyo duruufaha jira ayaase keenay dib-u-dhaca. Xeer-ilaaliyayaal iga horreeyay aniga ayaa jiray, iyaguna muddo badan ayay dedaalayeen, hase yeeshee marka ay xukuumaddu diyaar u noqoto oo keliya ayay

xeerarka soo gudbinaysaa. Xeerkani siyaasad ayuu ku soo gudbay, waana sababta ay labada xeer—Xeerka Habka Ciqaabta iyo Xeerka Ciqaabta Guud—hal mar loo wada soo gudbiyay. Xeerka Ciqaabta waxa ku jira qodobo badan oo, marka la eego, oggolaanaya in guri la geli karo. Qodobka 55aad ayaa oggolaanaya in guri la galo xilli kasta oo loo baahdo. Qodobkaasi waxa uu ka turjumayaa xeerarkii hore ee lagu dhaqmi jiray.

Boolisku haddii uu arko in dembi la baabi'inayo, maragyadii la tirtirayo ama caddeymo la qarinayo, boolisku xaq buu u leeyahay inuu galo gurigaas, qofkana soo qabto, isla markaana maxkamad geeyo. Qodobka 55aad ayaana u fasaxaya arrintaas iyada oo aan waaran ama oggolaansho hore la qaadan.

| | |
|---|---|
| **Cawad Cali Maxamed** | **C/risaaq Siciid Ayaanle** |
| **Agaasimaha waaxda Hadal Qoraalka G/G/Wakiilada** | **Xoghayaha Guud ee Golaha wakiilada JSI** |
| ------------------------------------------------ | ---------------------------------------- |